# XAASHIDO XAQIIQDA # 4

## SABOOLNIMADA KU SALAYSAN CAAFIMAADKA IYO DARYEELKA CARUURTA

Sidee dadka midab kala sooca ahi ugu liita xagga caafimaadka iyo daryeelka caruurta?

**Cunsuriyadda:**
Daraasado ayaa soo jeedinaya in dhowr arrimood ay si xun u saameeyeen caafimaadka dadka asliga ah iyo dadka midabka leh ee Kanada, oo ay ku jiraan walaac nefsiyeed ee ku noolaashaha jawiga cunsuriyadda; fursado dhaqaale oo aan loo sinnayn; guri xumo; cunto yaraan; helitaan aan loo sinnayn si loo helo waxbarasho iyo agabyada kale ee bulshada; soo gaadhista sunta deegaanka oo aan loo baahnayn; ka shaqeynta shaqo khatar ah oo aan macquul ahayn; kalsooni darro nidaamka daryeelka caafimadka iyo ka faa'iidaysiga barnaamijyada baaritaanka.

**Midab Takoor:** In kasta oo qoysaska caddaanka ah ay leeyihiin xad gudubyo xun xun oo caruurta ah taasoo la mid ah qaysaska ka soo jeeda bulshooyinka la cunsuriyadeeyo, daraasad dhawaan la soo gabagabeeyay ayaa ahayd: Caruurta madow iyo dhalinyarada waxay u badan tahay in boqolkiiba 40 la baaro marka loo eego caruurta caddaanka ah.
Caruurta asaliga kaligood ayaa muujiyey kala duwanaanta weyn ee kan caruurta madow.

**Wakiilsare:** Asaliga, Madawga, iyo caruurta kale ee la takooro ayaa si aad ah loogu matelay nidaamka daryeelka caruurta. Magaalada Toronto tirade dadkeeda marki lo eegay dadka madaw ee Kanadeyska ah waxay ka kooban yihiin boqolkiiba 8.5, "laakin boqolkiiba 40 caruurtu waxay ku jiraan daryeel.

**Daaweynta:**
Dadka asaliga ah iyo dadka midabka leh waxay soo sheeqgan in lagu kadeedey dhaqan xumo, ixtiraam darro, naxariis darro, xil ka qaadis ama shaqo ka eryid ay sameeyaan shaqaalaha daryeelka cafimaadka sababtuna ay tahay midab takoorka, midab sala sooca fikradda khaldan. Guddiga xuquuqul insaanka aya helay sanadkii 2017ka in shaqaalaha caafimadku badanaa aysan ula dhaqmin si dhab ah calaamadaha dadka asaliga ah sababto ah waxay u maleeyaan in ay sakhraansan yihiin. Sidoo kale calaamadaha bukaanka madow ee cudurka dhiig yaraanta haya "sickle cell anemia" waxaa had iyo jeer loo diida xanuun la xariiro caadooyinka daroogada.

### Diirad Gelinta Dadka Asaliga as

**Dhaqan marin:**
Nidaamka cilmi nafsiga weli waa mid lagu qiimeeyo Eurocentric, aragtida adduunka iyo ku dhaqan ahaan, sidaas darted soo bandhigidda caqabado nidaamyo ah, marxalad kasta oo ka mid ah isdhexgalka dadka ka socda kooxaha isir nacaybka.
**OHIP:** (Ontariyo Qorshaha caymiska caafimaadka)
Soogalootiga cusubi waa inuu 3 bilood sugaa OHIP taasoo keeneyso kharashyo aan la awoodi Karin ama baahi caafimaad oo aan laga murugsanayn.

## Diirad Gelinta dadka Asaliga ah:

Dadka asaliga ah waxay la kulmaan natiijooyinka caafimaad ee ugu xun koox kasta oo ka jirta Kanada. Haweenka asaliga ah waxay la kulmaan heerar sare oo dhiig kar ah, cudurka wadnaha, kaadi macaanka, kansarka xubinta galmada dumarka iyo kaadihaysta, HIV, AIDS, daroogada, cudurka maskaxda iyo isdilitaanka.
Caruurta asaliga ah ayaa kaliya boqolkiiba 4.1 ka ah gobolka ontaariyo oo da'dooda ka yar tahay 15 jir, lakiin waa ku dhawaad boqolkiiba 30 caruurta la korsaday. Waxay si buuxda wakiil uga yahiin dhamaan go'aan qaadashada daryeelka caruurta, taasina waxay kordheysaa goorta go'aamada ay noqdaan kuwa soo jiidasha leh.
Khilaafaadka awooda maamul ee heer federaal ayaa ka reebay caruurta asaliga in ay maalgeliyaan adeegyada caafimaadka. In kastoo mabda'a "Jordan" loola jeedo in la hubiyo in dawladda ee xidhiidhka kowaad ay bixiso adeega ayada oo aan dib loo dhicin, mabda'a waxa si xadidan u adeegsaday dawladihii falka ku jiray marka laga reebo caruur badan oo asaliga ah oo leh baahi caafimaad.



Qiyaasta isdilka ee dhalinyarada ummadda kowaad waxay ka badantahay ilaa 7 jibbaar marka loo eego dhalinyarada aan asaliga ahayn.
Bishii April 2016kii shan caruur ah ayaa is ku dayay in ay naftooda qaadaan habeen jimca ah Attawapiskat ummadda koobaad ee waqooyiga Ontariyo.

Saamaynta soogalotiga caafimaadka leh: Daraasadaha ayaa sheegaya in saamaynta soogalootiga caafimaadka leh (soogalootiga caafiimaadka qabo ay la kulmaan hoos u dhac caafimaad ka dib imaanshaha wadanka martida loo yahay) way ku xoog badan tahay soogalootiga ka yamid wadamada saboolka ah ama dhaqamada fog fog..

**Badhitaanka:** Haweenka ka socda kooxaha dakhligoodu hooseeyo iyo dumarka la takooro waxay u badan tahay in ay yeeshaan baadhitaano naasaha caafimaad, raajo mommogramka si loo baadho kansarka naasaha, ama PAP smear si loo baadho kansarka ilmo galeenka.

### Rajada Noolasha:

Ku dhawaad boqolkiiba 70 ragga ku nool xafadaha ugu qanisan ayaa ku noolaan doona da'da 75, halka kaliya boqolkiiba 50 ragga ku nool xaafadaha ugu saboolsan ay gaari doonin da'daas.

### Marin:

Sanadkii 2014ka, ku dhawaad boqolkiiba 13 dadka reer kanada ee dakhligooda hooseeyo marka la bar bar dhigo boqolkiiba 10 dadka Kanada ee dakhligoood dhexdhexaadka yahay iyo kuwa dhakhligoodu sarreeyo ayaa qabo baahiyo daryeel caafimaad oo aan la daboolin, ayagoo soo jeediyay in ay dhibaato ka haysato heliraanka daryeel caafimaad.

**Qoraalka Degdeg ah**

Markaan tixraacno dadka midabka leh waxaan u hadalnaa dadka Kanada ee asal ahaan aan yurub ka soo jeedin ama dhaxalka labadaba dadka midabka leh ee u dhashay Kanada iyo sidoo kale kuwa ku dhashay meel kale.

Markaan tixraacno dadka asaliga ah waxaan u hadlaynaa shaqsiyaadka ummadda koowaad (First Nation) Inuit iyo Metis. Magaalada Toronto, boqolkiiba 62 dadka ku nool saboolnimada waxay ka soo jeedaan kooxo la midab takooro. Boqolkiiba

52 dadka midabtakoorka Kanada ee k u nool saboolnimada waxay degen yihiin Ontario. Reeraha ka hooseeyo dakhligooda dakhliga Kanada ee hooseeyo (LICO) ama cabirka dakhliga hoose (LIM) waxay ku bixiyaan boqolkiiba inta aad u badan dakhligooda daruuriga aasaasiga ah sida cuntada iyo hoyga marka loo

eego qoyska caadiga ah: Sidan ayaan u cabbirnaa saboolnimada. Midab kalasooca habeysan ayaa badanaa keena xaqiraad hay'ad qarsoon oo ku saabsan siyaasadaha, dhaqannada iyo habraacyada mudnaanta u leh ama u faa'iideysan kara koox dad ah. Waxay noqon kartaa natiijada ka soo baxa sida wax loo sameeyo had iyo jeer iyada oo aan la tixgelinaynin sida ay u sameeysaan kooxo gaar ah sida duwan.

Caruurta la midab takooro waxay u nugul yihiin noocyada xadgudubka midab takoorka iyo dhaqan ahaan aan habooneyn ee lagu hayo guriga korinta.
Hal aragti hal cod (2016kii) oo ah warbixin diiwaangelineysa nidaamka midab kala sooca madow ee hawlaha daryeelka caruurta ee Ontario ayaa sheegayaa in waalidiinta caddaanka oh ee koriyayaasha ah in ay inta badan xiiraan timaha gabdhaha madawga ah ee lagu meeleeyay daryeelkooda, ayado u keenaya waxyeelo nafsiyan ah.

Guddiga Runta iyo Did-u-heshiisiinta ayaa maqlay in nidaamka daryeelka caruurta uusii wada wareegtooyin badan oo kala duwan oo barakac iyo kala guuritaan ah, caruur badan ayaa lumiyey xariirkii qoysaskooda iyo aqoonsigooda abtirsiimo weligood.

## Maxaa La Qabtay?

Guud ahaan xuduudaha waxay bixiyaan adeegyo kala duwan oo firfircoon oo taageero caafimaadka maskaxda iyo adeegyo waxayna ka shaqeeyaan cunsuriyadda/midab-takoorka ka soo horjeedka madow iyo qaabab diidmo dulmiga. Qaab dhismeedyadaani waxay wax ka qabanayaan saameynta xun ee cunsuriyadda iyo takooridda caafimaadka maskaxda iyo samaqabka.
www.acrossboundaries.ca/info@acrossboundaries.ca

Xarumaha caafimaadka bulshada (CHC'S) sida helitaanka isbahaysiga caafimaadka, dhaqamada kala duwan iyo adeegyada bulshada, Anishnawbe Health Toronto Hamilton Urban Core, iyo TAIBU – iyo walooshood Aboriginal Health Access Centre (AHAC'S) Sida – Anishnawbe Mushkiki iyo Shkagamik – Kwe Health Centre waxay bixiyaan daryeel caafimaad ahaan, haboon, iyo daryeel caafimaad oo aasaasi ah bulshada dhexdeeda looga baahanyahay.

www.aohc.org/mail @aohc.org
Midabkasabood/Midab Isbeddelka